

Ma jiro hab keligii sax ah oo sheegaya waxa la samaynayo mar kasta. Inta badan waxa carruurta ka dhiga kuwo wanaagsan, waa waalid firfircoon oo la socda arrimaha korniinka ilmaha.

Waxannu samaynay tilmaame fudud oo aad adeegsan kartid si aad uu habsatid in xaalada ilmahaagu wacantahay.

Waad heli kartaa caawimo. Haddii aad raadsatid caawimo waxa aad wax wacan ka qaban kartaa mustaqbalka ilmahaaga iyo qoyskaaga. Halis ama ceeb maaha in aad caawimo raadsatid. Waxa aad tahay hooyo ama aabbe wacan haddii aad caawimo raadsatid. Dhammaanteen marmar ayeynu caawimo u baahannahay.

Haddii aad werwer qabtid waxa aad la xidhiidhi kartaa:

La-taliyaha dugsi, macalinka fasalka ama kaalkaalisada caafimaadka ee dugsi

Xarunta qoyska iyo hawlaha ee Marie Plathe familie og aktivitetssenter tlf. 920 34 629

Hay'adda Gaashaamidda Carruurta (Barnevernet) ee Bærum tlf. 67 50 68 00

Isuduweha Arrimaha ka hortagga ee Booliska tlf. 67 57 69 12

Isuduweha Arrimaha ka hortagga ee Dawladda hoose Bærum tlf. 67 50 32 15

Utekontakten tlf. 67 55 10 20

Telefoonka digniinta ee carruurta, dhallinta iyo waalidka tlf. 116 111

Wadahadalka, talooyinka, tilmaan-siinta iyo wadahadallada sii socodka ah ee lala yeelanayo ilmaha waxa lagu jaangoyaa dhibbaatooyinka jira, xaaladda iyo xidhiidhka ilmaha lala leeyahay.

TILMAAN-SIIN WAALID

WAXA SAMEEYAY URURADA AJNABIGA EE BÆRUM
- WAALID BAA SAMEEYAY, U SAMEEYAY WAALID.



Maxaad waalid ahaan qaban kartaa si aad uga hortagto in carruurtaadu ku biirto bulsho xun?

CAGAAR

Waxa aad taqaanaa dugsiga, layliyada dugsiga iyo waalidka kale. Waxaad ka qaybgashaa kulannada dugsiga.

Waxa aad ogtahay sida aad u xoojin karto waxbarashada ilmahaaga.

Waxa aad taqaanaa axsaabta carruurtaada iyo waalidkooda.

Ilmahaagu firfircooni ayuu sameeya wakhtiga firaqada iyo fasaxa dugsiga, adna waad ka gaybqaadataa.

Wakhti ayaad siisaa la joogga carruurta oo wakhti wacan ayaad la qaadataa.

Waad la socotaa waxa ilmahaagu ka sameeyo internetka ama moobaylka?

Waad ogtahay waxa aad samaynaysid haddii ilmaahaaga la caayo ama uu cid caayo.

Waad ogtahay meesha aad ka helaysid caawimo, haddii aad ka werwersantahay arrimaha qoyskaaga.

Ma jirto sabab aad u werwerto.

JAALE/HURUUD

Si fiican uma taqaanid dugsiga, maadooyinka dugsiga iyo waalidka kale.

Ma ogid meesha kaa caawin karta horumarinta waxbarashada ilmahaaga.

Ma taqaanid axsaabta carruurtaada.

Ma ogid waxa ilmahaagu sameeyo xilliga firaqada.

Carruurta lama qaadatid wakhti badan xilliga firaqada iyo fasaxyada.

Ma ogid waxa ilmahaagu ka sameeyo internetka ama moobaylka.

Waxa aad dareentay isbeddel ku yimi habdhaqanka, labiska iyo luuqadda ilmahaaga mana ogid sababta.

Ilmahaagu ma yimaado guriga xilligii lagu balamay.

Waxa kordhay ka maqnaanshaha dugsiga ee ilmahaaga.

Waxa aad dareentay in ilmahaaga iyo adigu aydaan wadahadlin wax badan.

Sabab loo werwerro ayaa jirta. La hadal ilmahaaga oo raadso talo iyo tilmaamo.

CASAAN/GUDUUD

Wax xidhiidh ah lama lihid dugsiga, waalidka iyo axsaabta ilmahaaga.

Ilmahaagu ma jecla inuu kula xidhidho, waxaanu kuu sheegaa waxyaalo aad been u malaynaysid.

Ilmahaagu waxa uu haystaa waxyaalo aanad siin lacagta lagu iibsado.

Ilmahaagu ma yimaado guriga xilligii lagu balamay.

Ilmahaagu wax badan ayuu ka maqnaadaa dugsiga.

Ilmahaagu muddo kooban ayuu ku beddelay habdhaqankiisa.

Ilmahaagu wakhti badan ayuu joogaa Oslo, mana ogid sababta.

Sabab weyn oo loo werwerro ayaa jirta. Ha sugin, raadso caawimo iyo talooyin.